# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-1520/012013

DATE 09/01/13

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0282/012013

## Dhaqan-galka Wax Ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Guddiga Mihnadlayaasha Caafimaadka Xeer Lr. 19/2001

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markuu Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-19/582/2012 ee ku taariikhaysan 27/12/2012 ee ay ku ansixiyeen Wax Ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Guddiga Mihnadlayaasha Caafimaadka Xeer Lr. 19/2001;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Wax Ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Guddiga Mihnadlayaasha Caafimaadka Xeer Lr. 19/2001 ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

RL: 06
RECEIVED
10/01/2013

*Jamhuuriyada Somaliland* | *Republic of Somaliland*

*Golaha Wakiilada*
*Xafiiska Xoghayaha Guud*
*Ref :-* GW/G/16/174/2012

*House of Representatives*
*General Secretary Office*
*Date* 30/12/2012

## Ku: - Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland.

**Ujeedo:-Soo Gudbin Go'aankaAnsixinta Wax- ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Gudiga Mihnadlayaasha Caafimaadka Xeer (No. 19/2001).**
**&**
**Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer (No. 59/2012).**

**Mudane Madaxweyne,**

Waxa aan si sharaf iyo qadarin leh halkan kuugu soo gudbinaynaa nuqulada Go'aanka ansixinta ee **Go'aankaAnsixinta Wax- ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Guddiga Mihnadlayaasha Caafimaadka Xeer (No. 19/2001).iyo Xeerka Hay'adda Sirdoonka Qaranka Xeer (No. 59/2012).**

1. Go'aan Lr. **GW/G/KF-19/581/2012**
2. Go'aan Lr. **GWG/KF-19/582/2012**

Waa ka gabtay
Maxed Omar

**ALLAA MAHADLEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle.**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiiladda JSL.**

XAFIISKA XOGHAYAHA GUUD EE GOLAHA WAKIILADA
GOLAHA WAKIILADA SOMALILAND

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilada
Xarunta Hargeysa.

Ref: GW/G/KF-19/ 582/2012 Date 27/12/2012

**Ujeedo:- Go'aanka Ansixinta Wax- ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Gudiga Mihnadlayaasha Caafimaadka Xeer (No. 19/2001).**

## GOLAHA WAKIILADA JSL

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | **Qodobka 17[aad]** ee Dastuurka JSL. |
| MARKUU TIXGALIYAY: - | Bahida loo qabo xeer lagu maamulo arimaha Mihnad layaasha Caafimaadka dadka. Lagagana Hortago dhibaatada bulshada kaso gaadhi karta Marka aan loo miidan dayin Daawaynta,goobaha adeega caafimaad,mihnad-yahanada caafimadka iyo Daawada. |
| MARKUU ARKAY: - | Bahida loo qabo Nidaam dhiiri galiya oo dhawra isla markaana ilaaliya caafimaadka iyo daryeelka dad waynaha iyadoo loo adeegsanayo Xeer lagu Xakamaynayo mihnadaha caafimaadka loo xaqiijiyo in dadwaynuhu helo adeegyo caafimaad oo bedqaba |
| MARKUU XAQIIQSADAY: - | In aqoonta iyo adeega Caafimad uu sii hormarayo , siina baladhanayo loona baahanyahay Xeerka aqoonta iyo adeegyada caafimaad lagu nidaaminayooo gaadhsiisan heerka caalamiga ah. |
| MARKUU AQOONSADAY : - | Inay lama huraan tahay in wax ka bedel lagu sameeyo lana kaabo xeerka mihnadaha caafimaadka Xeer Lr.19/2001 |
| MARKUU ARKAY: | Go'aanka ansixinta Xeer **LR: 19/2001** ee Golaha Wakiilada u gudbiyeen Golaha Guurtida JSL kuna taariikhaysnaa 30/10/2012 |
| MARKUU ARKAY: | Go'aanka ansixinta Xeer **LR: 19/2001** ee Golaha Guurtida SL kuna taariikhaysnaa **10/11/2012** |

**MARKUU ARKAY :** In Golaha Guurtida wax ka bedal iyo kaabis ku samaynin Kuna ansixiyeen cod dhan( **42) laba iyo afartan mudane** Wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Guddiga Mihnadlayaasha Caafimaadka **Lr: 19/2001** kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiilada ugu gudbiyeen.

# WUXUU

Golaha Wakiilada JSL halkan ugu soo Gudbinayaa Madaxwaynaha JSL Xeer Lr: **19/2001** Wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Guddiga Mihnadlayaasha Caafimaadka Somaliland si uu uga guto waajibaadkiisa Dastuuriga ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

*C/risaaq Siciid Ayaanle*
*Xoghayaha. Guud ee Golaha Wakiilada*

*Baashe Maxamed Faarax*
*K/simaha Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ahna G/Xigeenka 1aad*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## <u>GOLAHA WAKIILADA</u>

Wax ka-badelka iyo kaabista Xeerka Gudidda Mihnadlayaasha Caafimaadka Xeer Lr. 19/2001

**October 2012**

# GOLAHA WAKIILADU

**Markuu arkay:** Qodobka 17aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahidda loo qabo xeer lagu maamulo arrimaha Mihnadlayaasha caafimaadka dadka, lagagana hor tago dhibaatada bulshada ka soo gaadhi karta marka aan loo miidaan dayin daawaynta, goobaha adeegga caafimaad, Mihnąd-yahanada caafimaadka iyo daawada.

**Markuu arkay:** Baahida loo qabo nidaam dhiiri geliya oo dhawra islamarkaana ilaaliya caafimaadka iyo daryeelka dadwaynaha iyada oo la adeegsanayo xeer lagu xakameeyo Mihnada ha caafimaadka si loo xaqiijiyo in dadwaynuhu helo adeegyo caafimaad oo bedqaba.

**Markuu xaqiiqsaday:** In aqoonta iyo adeegga caafimaad uu sii horumarayo, siina ballaadhanay, loona baahan yahay Xeerka aqoonta iyo adeegyada caafimaad lagu nidaaminayo oo gaadhsiisan heerka caalamiga ah.

**Markuu aqoonsaday:** In ay lama huraan tahay in wax ka bedel lagu sameeyo lana kaabo Xeerka Mihnada ha Caafimaadka Lr. 19/2001.

Wuxuu soo saarey **Wax ka badalka iyo Kaabista xeerka Gudidda Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka JSL X.lr.19.2001**

## QAYBTA KOOWAAD
## TILMAAMAHA GUUD

### Qodobka 1aad
### Ereybixin

Erayada iyo weedhaha ku xusan xeerkan haddii aan xeerar kale si kale u macnayn waxa loo fasirayaa sidan:

**Gudidda:** Waxa looga jeedaa Gudidda Qaran ee Mihnadaha Caafimaadka waana hay'ad lagu abuuray Xeerkan masuulna ka ah diiwaan gelinta, rukhsad siinta, iyo anshax marinta Mihnadlayaasha caafimaadka; ansixinta adeegyada iyo barnaamijyada caafimaadka; ·iyo oggolaansho siinta rugaha iyo barnaamijyada wax lagu baro Mihnadlayaasha caafimaadka.

**Xubnaha**: waxa loola jeeda xubnaha Gudidda Mihnadlayaasha caafimaadka ee ku xusan Xeerkan.

**Diiwaan**: waxa loola jeedaa diiwaan kasta oo u soo baxa si xeerkan waafaqsan.

**Mihnadle:** waxa loola jeedaa qof kasta oo aqoon u leh adeegyada Caaafimaadka dadka, daawooyinka, qashaafadaha, shaybaadhidda iyo wixii kale ee la xidhiidha caafimaadka iyo fayo-dhawrka oo Gudiddu aqoonsan yahay.

**Dhakhtar:** waxa loola jeedaa qof kasta oo leh aqoon heer jaamacadeed oo ku saabsan Caafimaadka, daawada iwm, oo Gudiddu aqoonsaday.

**Kalkaaliye:** waxa loola jeedaa qof kasta oo haysta shahaado machad tababar adeeg caafimaad oo la aqoonsan yahay ama waaya-aragnimo dheer oo Gudiddu aqbalay markuu qiimeeyay.

**Farsama-yaqaan:** waxa loola jeedaa qof kasta oo 1oo tababaray adeeg caafimaad oo gaar ah sida, sheybaadhidda, qashaafadda, nafaqaynta, iwm oo Gudiddu aqoonsaday.

**Wasiir**: waxa loola jeeda wasiirka Wasaaradda Caafimaadka.

**Goob-Caafimaad:** waxa loola jeeda meel kasta oo lagu fuliyo adeeg caafimaad; sida daawayn, qaliin, shaybaadhid, cusbitaal, bukaan socoto, khashaafad, la talin iwm.

**Cusbitaal:** waxa loola jeedaa goob kasta oo lagu daweeyo bukaan jiif nooca ama noocyda cudurada jidhka ama maskaxda ka mid ah oo Gudiddurukhsad ka haysta.

**Farmasi:** waxa loola jeedaa meel kasta oo ku hawlan samaynta, iibinta (jumlad & tafaariiq), kaydinta iwm ee dawooyinka.

**Kuliyad**: waxa loola jeedaa goob waxbarasho caafimaad oo sharci lagu aqoonsaday.

**Diiwaangelin goob caafimaad**: waxa loola jeedaa diiwaangelinta cusbitaalada, goob adeeg caafimaad, guryo lagu xanaaneeyo dadka buka ama waayeelka ah, meelaha baadhsita cudurada, iyo adeegyada kale ee dhinaca daawaynta.

**Rukhsad:** waxa loola jeedaa oggolaansho uu bixiyey Gudiddu taas oo u oggolaanaysa rukhsad-haystaha in uu ku shaqaysto nooca caafimaadka ee rukhsadda loogu ogolaaday.

**Hayadaha caafimaadka**: waxa loola jeedaa hay'adaha waxbarashada caafimaadka, baadhista caafimaad ee danta guud iyo gaarka loo leeyahay iyo hay'adaha samafalka ee ku hawlan caafimaadka.

**Qodobka 2aad**
**Ujeedada xeerka**

Ujeedada xeerka waxa ka mid ah

1. In loo sameeyo xeer kala haga oo nidaamiya Mihnadlayaasha caafimaadka ee xeerkan ku xusan noocay doonaan ha ahaadeene.
2. In loo sameeyo xeer kala haga oo nidaamiya goobaha adeegga caafimaadka iyo goobaha waxbarashada caafimaadka.
3. In kor loogu qaado waxbarashada iyo ku shaqaysiga Mihnadda caafimaadka.
4. In Gudiddaloo siiyo awood uu ku maamulo xeer-nidamiyaha lama huraanka ah ee lagu xaqiijinayo ujeedooyinka xeerkan.
5. La shaqaynta Wasaaradda Caafimaadka iyo wasaaradda Waxbarashada iyo tacliinta sare.
6. Ururinta iyo lafo gurka macluumaadka la xidhiidha waxbarashada Mihnadda caafimaadka.

**Qodobka 3aad**
**Aasaaska iyo magaca**

Xeerkan waxa lagu aasaasay Gudidda Mihnadlayaasha Caafimaadka Somaliland kaas oo leh shaqsiyad qaanuuni ah oo madax bannaan, lehna shaambad u gaar ah.

**Qodobka 4aad**
**Astaanta Gudidda**

Gudidda Mihnaddaha Caafimaadku wuxuu yeelanayaa astaan u gaar ah oo noqonaysa ta Gudiddu is la-qaato.

**Qodobka 5aad**
**Xarunta Gudidda**

Xarunta Gudiddu waa Caasimadda Somaliland ee Hargeysa.

**QAYBTA LABAAD**
**QAAB DHISMEEDKA GUDIDDA**
**Qodobka 6aad**

1. Gudidda Qaran ee Mihnadlayaasha Caafimaadku waxa uu ka kooban yahay:
    - Gudidda Qaranka.
    - Xafiiska Agaasinka Fulinta.

2. Gudidda Caafimaadka ee heer qaran wuxuu ka kooban yahay 13 xubnood.

3. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Xigeenka Gudidda waxa soo magacaabaya Madaxweynaha JSL.

4. Muddada xilka Guddoomiyaha iyo guddoomiye xigeenku waa saddex (3) sano oo ka bilaabmaya maalinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare dhaariyo. Waxa guddoomiyaha iyo guddoomiye xigeenka dib loo soo magacaabi karaa hal mar keliya.

5. 11 ka xubnood ee kale ee Gudidda waxay ka kooban yihiin;
    - Xubin ka imanaysa Wasaaradda Caafimaadka.
    - Xubin ka imanaysaWasaaradda waxbarashada iyo Tacliinta Sare.
    - *Xubin ka imanaysa Xeer-ilaalinta Guud.*
    - *Xubin ka imanaysa dadweynaha oo Gudidda Ganacsigu (Chamber of Comerce) soo xulayo.*
    - *Xubin ka imanaysa Hay'adda Dhowrista Tayadda Qaranka (Quality Controlka Commission)*
    - Xubin ka imanaysa Ururka Dhakhaatiirta Somaliland.
    - Xubin ka imanaysa Ururka Kalkaaliyaasha iyo Umulisooyinka.
    - Xubin ka imanaysa Ururka Shaybaadhada.

- Xubin ka imanaysa Uururka Farmasiyada.
- Xubin ka imanaysa kuliyadaha caafimaadka.
- Xubin ka imanaysa Kuliyadaha iyo macaahidda kalkaaliyayaasha iyo Umulisoyinka.

6. Xubnaha kor ku xusan waxa soo magacaabaya madaxa xafiiska ay ka socdaan.
7. Muddada xilka xubnaha, marka laga reebo Guddoomiyaha iyo guddoomiye xigeenka, waa laba (2) sano oo ka bilaabanta maalinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare xilka u dhaariyo. Waxa dib loo soo magacaabi karaa ugu badnaan saddex (3) jeer.

**Qodobka 7aad**
**Shuruudaha Xubinnimada Gudidda Qaran**

1. Qof kasta oo xubin ka noqonaya Gudidda waa in uu buuxiyaa shuruudahan:
   a. Waa in uu yahay Somalilander,
   b. Waa in uu haystaa shahaado jaamacadeed oo la xidhiidha Mihnadiisa iyo waayo aragnimo u dhiganta oo aan ka yarayn Shan sano.
   c. In uu yahay qof ku sifoobay anshax wanaagsan.
   d. In aanay ku dhicin xukun ciqaabeed Kama danbays ah.
2. Waxa xubinnimada Gudidda lagu waayi karaa markay timaaddo xaalad xaaladahan ka mid ahi:
   a. Geeri.
   b. Is-casilaad.
   c. Waayid mid ka mid ah shuruudaha xubinnimda ee farqadda hore.
   d. Muddada xubinnimada oo dhammaata.
   e. Haddii uu ka soo qayb geli waayo laba fadhi oo isku xiga cudur daar la'aan.
3. Haddii xubin Gudidda ka mid ahi bannayso waxa loo soo buuxinyaa hadba habkii ay xubintu ku timi markii hore.

**Qodobak 8aad**
**Xilka iyo waajibaadka Gudidda**

1. Kaydinta iyo diiwangelinta aqoonyahannada iyo goobaha adeegga caafimaadka iyo goobaha waxbarashada caafimaadka mid gaar ah iyo mid guudba.
2. Daba-galka, kormeerka iyo qiimaynta hawlwadeennada, goobaha adeegga caafimaadka iyo goobaha waxbarashada caafimaadka.
3. Horumarinta tayada caafimaadka sida tabobarrada, wacyigelinta iyo cilmi baadhista.
4. Go'aan ka gaadhidda furidda kuliyadaha caafimaadka.
5. Hubinta shahaadooyinka caafimaadka.

6. Ansixinta diiwaannada Kama danbaysta noqda.
7. Hubinta, dabagalka aqoonta iyo kormeeridda aqoonta Mihnadlayaasha iyo goobaha adeegga caafimaadka.
8. Kala talinta Wasaaradda Caafimaadka wixii ku saabsan arrimaha caafimaadka.
9. Ka warbixinta tayada caafimaadka ee dalka ama meelo ka mid ah dalka.
10. *Talaabo ka qaadista dhakhtarkii khalad sameeya ama Mihnadiisa si kale u adeegsada.*

**Qodobka 9aad**
**Awọoddaha Gudidda heer Qaran**

Gudiddu waxa uu awood u leeyahay arimahan soo socda:

1. Ansixinta istiraatijayadda iyo qorshe hawleedka Gudidda.
2. Gudiddu wuxuu awood u leeyahay in u galo goob kasta oo caafimaad.
3. In uu anshax mariyo hawl wadeennada iyo goobaha caafimaadka mid gaar ah iyo mid guud ahaaneedba, iyo Mihnadlayaasha caafimaadka, go'aanna ka gaadhi karo.
4. Ogolaansho siinta iyo ka qaadista goobaha adeegyada wax-barashada iyo barnaamijyada caafimaad.
5. Go'aaminta lacagaha rukhsad siinta iyo ansixinteeda.
6. Ansixinta soo jeedinaha Agaasimaha Fulinta.
7. In uu laalo kuliyad caafimaad oo Gudiddu go'aamiyey inay ka hoosayso heerkii looga baahnaa.
8. Inay hubiso in imtixaanaadka kulliyadaha caafimaadku yihiin kuwo gaadhsiisan heerkii tacliimeed ee looga baahnaa.
9. Inuu rukhsad siiyo dhammaan Mihnadlayaasha caafimaadka.
10. Inuu bixiyo shahaado hawl-karnimo cidii mutaysata.
11. Soo saaridda iyo ansixinta Xeer-nidamiyayaal laga dheegto xeerkan.
12. Ansixinta shaqaalaha Gudidda.
13. Ansixinta qorshe hawleedka Gudidda.
14. Dhaqan gelinta iyo fulinta xeer-nidaamiyayaasha Gudidda.
15. Ansixinta xuduudaha ay ka hawl-geli karaan Mihnadlayaasha caafimaadku.
16. Dabo-galka iyo dib-u-eegista heerarka tayo ee diiwaan-gelinta, rukhsad siinta, ku shaqaysiga, tacliinta habdhaqanka, Mihnadlayaasha, joogtaynta hawlgudasho ku dhisan aqoon iyo karti iyo ilaaalinta agabka adeegyada caafimaad.

## Qodobak 10aad
## Kulamada Gudidda heer Qaran

1. Gudidda heer Qaran wuxu fadhigiisa caadiga ah yeelanayaa **bishiiba hal mar.**
2. Kooramka Gudiddu ha waxa uu buuxsamayaa marka ay Gudidda fadhiyaan seddex meelood laba (2/3 ama 9 xubnood).
3. Waxa kale oo uu yeelan karaa fadhiyo aan caadi ahayn markay sidaas soo jeediyaan Guddoomiyaha ama 2/3 xubnaha Gudiddu.
4. Gudiddu waxa uu go'aamada ku qaadanayaa cod gacan taag ah, haddii tirada cododku isle'ekaato oo keliya Guddoomiyuhu waxa uu yeelanayaa laba cod.
5. Go'aanka Gudiddu wuxu ku ansaxayaa marka ay u codeeyaan kala badh iyo hal xubanaha fadhiya (simple majority).
6. Guddoomiyuhu isma hortaagi karo go'aan Gudiddu cod aqlabiyad ah ku gaadhey.

## Qodobka 11aad
## Awoodaha Guddoomiyaha

Awoodaha Guddoomiyaha Gudiddu waa:

1. Guddoominta iyo qaybinta doodda shirarka.
2. Isugu yeedhidda iyo wargelinta shirarka.
3. Diyaarinta ajendayaasha shirarka isaga oo la kaashanaya Agaasimaha Fulinta.
4. Dabagalka iyo fulinta go'aamada Gudidda.
5. Saxeexa qoraaladda iyo go'anaada ku baxaya magaca Gudidda.
6. Matalaadda Gudidda.
7. Hawl-gelinta Xubnaha Gudidda iyo Guddi-hoosaadyada.
8. Fulinta awoodaha Gudidda ee degdegga ah inta u dhexaysa shirarka Gudidda, isagoo la tashanaya xubnaha agaasinka fulinta iyo la taliyayaasha inta uu heli karo.
9. Fulinta hawlaha kale ee Xeerkan, xeer-hoosaadyada ama Gudiddu u xil saaraan yahay.
10. Guddoomiyuhu waxa uu ku hadlaa afka Gudidda.

### Qodobka 12aad
### Xilka Guddoomiye-xigeenka

1. Guddoomiye- xigeenku waxa uu qabanayaa waxa kasta oo uu u igmado guddoomiyuhu.
2. Waxa uu xilka guddoomiye haynayaa marka uu maqan yahay Guddoomiyuhu iyo marka uu gudan kari waayo shaqadiisa sababo caafimaad darteed.
3. Haddii ay Guddoomiyaha ku timaaddo xaaladaha ku xusan Qodobka 7aad ee Xeerkan, Guddoomiye xigeenka ayaa xilka haynaya inta la dooranayo Guddoomiye si aan bannaanaansho xil u dhicin.

### Qodobak 13 aad
### Agaasimaha Fulinta

1. Agaasimaha Fulintu waa sarkaalka ugu sarreeya ee maamulka iyo maaraynta, xidhiidhka, maaliyadda iyo shaqaalaha Gudidda.
2. Waxa shaqaalaysiinaya Gudidda iyagoo u eegaya aqoontiisa maamul, maarayneed iyo khibraddiisa.
3. Xulashada Agaasimaha Fulinta waxa lagu salayn doonaa nidaam uu ansixiyey Gudiddu.
4. Heshiis muddadiisu cayiman tahay ayay la geli doonaan Gudiddu muddadaas oo ay ka mid tahay muddo-hubineed.
5. Gudidda ayaa u xil saaran diyaarinta qeexitaanka shaqooyinka Agaasimaha Fulinta si waafaqsan masuuliyadihiisa.
6. Agaasimaha Fulintu waxa uu masuul ka noqon doonaa:
   a. Hawlaha maamul, maaliyadeed iyo miisaaniyadeed ee Gudidda.
   b. Inuu fuliyo awaamiirta iyo go'aamada ka soo baxa Gudidda heer Qaran.
   c. Soo jeedinta shaqaalaysiinta shaqaalaha Gudidda iyada oo uu ansixinayo Gudiddu.
   d. Kormeerka Shaqaalaha Gudidda.
   e. Dayactirka xayndaabka xafiiska, agabka iyo dhukumentiga Gudidda.
   f. Maaraynta xidhiidhada.
   g. Isuduwidda iyo dabagalka hawl-gallada guddi-hoosaadyada.

## Qodobka 16aad
## Habraaca Diiwaan-gelinta

1. Mihnadle kasta oo caafimaad oo doonaya inuu ka hawlgalo dalka waa inuu u soo qortaa codsi Gudidda.
2. Gudiddu wuxu dersayaa codsigaas, heerka aqoonta Mihnadlaha, khibraddiisa iyo qalabka goobta caafimaad ee uu ka halwgelayo.
3. Mihnadle kasta waxa waajib ku ah inuu u gudbiyo Gudidda wixii macluumaad ah ee Gudiddu uga baahdo.
4. Codsadayaasha ku guulaysta inay buuxiyaan shuruudaha Gudidda waxa loo ogolaanayaa in magacooda lagu diiwaangeliyo lana siiyo rukhsad ay ku shaqaystaan.
5. Muddada rukhsadu waa sannad.

## Qodobka 17aad
## Noocyada diiwaangelinta

1. **Diiwaan-gelinta isu-diyaarin Mihnad**: Mihnadlaha soo qalin jebiyey ee sita shahaado oo ka soo qaatay jaamacadaha Somaliland ama kuliyad, ama mac-had la aqoonsan yahay waxa lagu diiwaan gelinayaa diiwaanka isu-diyaarinta Mihnadle.
2. **Diiwaan-gelinta ku meel gaadhka ah:** Mihnadlaha ka soo qalin jebiyey jaamacad debedeed oo la aqoonsan yahay ama kulliyad ama mac-had lana soo shaqeeyey rug caafimaad oo dibedeed ugu yaraan 3 sannadood cadaynna ka soo qaatay waxa lagu diiwan-gelinaya diiwaanka ku meel gaadhka ah.
3. **Diiwaan-gelinta buuxda:** Mihnadle lagu diiwaangeliyey diiwaannada ku xusan labada farqadood ee hore waxa lagu diiwaangelinayaa diiwaanka hawl-wadeen caafimaad oo buuxda.
4. **Diiwaangelinta takhasuska:** Mihnadle kasta oo sita shahaado sare (postgraduate) waxa lagu diiwaangelinayaa diiwaan u gaar ah oo qeexaya takhasuska qofka iyo shaqadiisa.

## Qodobka 18aad
## Diiwaangelinta goobaha caafimaadka

1. Qof kasta oo doonaya in loo diiwangeliyo goob caafimaad wuxuu Gudidda u soo qoranayaa codsiga diiwangelinta goobta uu doonayo, waxana uu codsigaas ku soo lifaaqayaa magaciisa iyo magaca goobta.
2. Qof ama kooxi ma furan karaan goob caafimaad iyaga oo aan ogolaansho ka helin Gudidda, islamarkaana qof ama kooxi ma furan karaan goob

waxbarasho ama barnaamij waxbarasho caafimaad ilaa ay ogolaansho ka helaan Gudidda.

3. Qofka soo codsaday goob caafimaad waxa ka reebban:
    a. In aanu u qalmin shaqada.
    b. In aanu degelku u qalmin adeegga loogu talo galay.
    c. Dhismaha, qalabka iyo shaqaalaha kale aanay u qalmin adeegga loogu talo galay.
    d. Qofka soo codsaday ama masuulka ka ahi aanu ku jirin diiwaangelinta buuxda.
    e. Qofka codsiga soo gudbistay ma bedeli karo ama uma gudbin karo cid kale, waana in rukhsaddu ku koobnaataa ciddii soo codsatay.

**Qodobka 19aad**
**Rukhsad siin ku meel gaadh ah**

1. Gudiddu waxa uu bixin karaa rukhsad ku meel gaadh ah waxaana cod hal dheeri ku go'aamiya Gudidda, waana in aan rukhsadda ku meel gaadhka ahi ka badnaan 6 bilood.
2. Gudiddu waxa uu kala noqonayaa rukhsadda ku meel gaadhka ah qof kasta oo ku guul darraysta inuu buuxiyo shuruudaha rukhsadsiinta.
3. Qof kasta oo haysta rukhsad ku meel gaadh ah waxa loola xisaabtamayaa sida qofka haysta rukhsad dhamays tiran.

**Qodobka 20aad**
**Cusboonaysiinta rukhsadaha**

1. Qof kasta oo doonaya in loo cusboonaysiiyo rukhsad waa in uu buuxiyo shuruudaha Gudidda ee cusboonaysiinta rukhsadaha.
2. Qof kasta oo rukhsaddiisa ku cusboonaysiin waaya bil gudeheed oo ka bilaabanta maalinta rukhsaddu ka dhacdo waxa uu waayayaa ku shaqaysiga Mihnada dalka gudihiisa.
3. Qof kasta oo rukhsaddiisu muddo dhaaftay sadex sano in ka badan wuxuu xaq u leeyahay inuu Gudidda dib uga codsado in loo cusboonaysiiyo.
4. Waxa Gudidda u bannaan inuu shardi uga dhigo qofka rukhsaddiisu muddo dhaaftay inuu dhamaysto barnaamij uu aqoontiisa kor ugu qaadayo.
5. Qof kasta oo loo diiday in la siiyo rukhsad uu ku shaqaysto waxa u xaq u leeyahay inuu Gudidda waydiisto in go'aanka diidmada dib loogu eego.

6. Gudiddu waxa uu qofka rukhsadda loo diiday siinayaa go'aanka diidmada, waxana qofkaasi xaq u leehay in uu rafcaan uga qaato Maxkamadda Sare JSL.

## QAYBTA AFRAAD
## ANSHAXA IYO ASLUUBTA MIHNADLAHA CAAFIMAADKA

### Qodobka 21aad
### Gudi-Hoosaadka Anshaxa

1. Gudiddu waxay yeelanayaa Gudi hoosaad Anshax marineed.
2. Muddada xilka Gudi-hoosaadku waa inta hawsha loo xilsaaray socoto.
3. Tirada Guddidu waa Shan (5) xubnood.
4. Gudidda ayaa iska dhex magacaabaya gudi-hoosaadka anshaxmarinta, waxana guddoominaya Guddoomiye-xigeenka Gudidda. Haddii guddoomiye xigeenka jagadiisu bannaantahay Guddoomiyaha Gudidda ayaa magacaabaya guddoomiyaha gudi-hoosaadka anshaxmarinta.
5. Qof kasta oo Mihnadle ah oo ku shaqaysta isaga oo aan wax rukhsad ah haysan ama si sharci darro ah u furta una bixiya adeeg waxbarasho isagoon ogolaansho ka haysan. Gudidda waxa la marinayaa anshaxmarinahan soo socda:
   a. Qoraal canaan ah.
   b. In laga joojiyo shaqada ama laga laalo goobta adeeg waxbarasho.
   c. In shaqada laga joojiyo qofka Gudiddu ku helo in aan maskaxdiisu dhammayn.
   d. Qof kasta oo bixiyey macluumaad beena ama Gudidda ka qariyey xog mihiim ah si uu u helo rukhsad uu ku shaqaysto waxa laga joojinayaa shaqada.
   e. Qof kasta oo galay fal halis gelinaya caafimaadka dadwaynaha waa in laga joojiyaa shaqada.
   f. Qof kasta oo si badheedha ugu xadgudba qodob ka mid ah qodobbada xeerkan waxa laga joojinayaa shaqada.
   g. Waxaa anshax marinta Guddidu gaadhaysaa Mihnadle kasta oo si badheedh ah u been abuura magac ama cinwaan si uu ugu shaqaysto Mihnad caafimaad ama isagoon diiwaangashanayn ku hawl gala Mihnad caafimaad.
6. Anshax marinaha ka dhasha farqadaha kor ku xusan ee qodobkan waxay Guddidu ka soo saaraysaa qaraar maamul oo sababaysan waxana qaraarkeeda rafcaan looga qaadan karaa Maxkamadda Sare maamul ahaan, haddii aan denbigu noqon ciqaab markaas oo loo gudbinayo Xeer-ilaalinta.

## Qodobka 22aad
## Ka tirtiridda diiwaanka

1. Gudiddu wuxuu ka tirtirayaa diiwaanka Mihnadle diiwaangashan oo maxkamadi ku xukuntay xukun ciqaabeed ka dhashay anshaxmarinta ku xusan qodobka 21.
2. Waxa kale oo diiwaanka laga tirtirayaa Mihnadle kasta oo lagu helo denbi dhaqan xumo Mihnadeed oo xooggan.
3. Qofka laga tirtiro diiwaanka haddii goob caafimaad ahaan magaciisa loogu diiwaangeliyey, goobtaasi magaciisa kuma sii shaqayn karto.

# QAYBTA SHANAAD
# QODOBBO KALA DUWAN

## Qodobka 23aad
## Dhaqaalaha Gudidda

1. Dhaqaalaha Gudiddu waxa uu ka imanayaa misaaniyadda dawladda.
2. Lacagaha Gudidda la siiyo sida deeq, yabooh (fundraising) maalgelin iyo kobcin munaasib ah.
3. Lacagaha Gudiddu qabato, iyadoo u isticmaaleysa si waafaqsan Shuruucda dalka u taal.

## Qodobka 24aad
## Hanti dhawr

1. Gudiddu waxa uu yeelanayaa hanti dhawre ka yimaadda Gudidda debeddiisa, waxa kale oo uu yeelan karaa hanti dhawre Gudidda dhexdiisa ka yimaadda.
2. Waxa u bannaan in la hawlgeliyo hanti dhawraha Qaranka habka loo maamulayo hanti dhawrkana waxa lagu maamulayaa Xeerarka Hanitdhawrka Qaranka ee Baarlamaanku ansixiyey.

## Qodobka 25aad
## Bixinta Shahaadada Diiwaangelinta Goobta

Guddigu wuxuu siin doonaa shahaadada diiwaan-gelinta goob kasta oo adeeg caafimaad ama adeeg wax-barasho caafimaad, iyadoo qaabkeeda iyo muddadeeda Gudiddu xeer-hoosaad ku soo saari doono.

## Qodobka 26aad
## Bixinta Rukhsadda Diiwaan-gelinta Goob Caafimaad Qof Ajanabi ah

1. Mihnad-yaqaanka ajenabiga ahi waa inuu haysto shahaadada u suurta gelinaysa in lagu diiwaan-geliyo diiwaanka ku habboon.

2. Mihnad-yaqaanka ajnabiga ahi waa inuu haystaa rukhsadda shaqo oo ansax ah ee dalka uu ka soo shaqeeyey.

3. Mihnad-yaqaan caafimaad ee ajanabi ah ee soo codsada rukhsadda diiwaan-gelinta Cusbitaal, goob adeeg caafimaad, goob baadhista cudurrada, waa inuu ku xidhan yahay cusbitaal ama adeeg caafimaad oo uu aqoonsan yahay Gudiddu lix bilood ka hor inta aanu codsiga rukhsadda diiwaan-gelinta soo qoran.

4. Mihnadlaha ajnabiga ah waxa lagu diiwaangelin karaa marka uu buuxiyo shuruudaha uu Gudiddu u dhigo.

**Qodobka 27aad**
**Goobaha Caafimaad ee Miyiga & Tuulooyinka**

Qofkii ka samaysta goob adeeg caafimaad meel miyi ah ama tuulo ah wuxuu bixin doonaa lacagaha rukhsad siinta diiwaangelinta oo ka yar inta magaalooyinka laga qaadayo waxana goynaya Gudidda, waxa kaloo Gudidda u bannaan inuu ka dhaafo lacagta rukhsad siinta.

**Qodobka 28aad**
**Daawaynta iyo Bixinta Talo Caafimaad**

1. Waxa reebban in uu bixiyo talo caafimaad, daawayn, cudur sheegid qof aan ahayn mid ogolaansho u haysta.

2. Talo kasta ama daawayn ama goob caafimaad oo uu bixiyo qof aan ogolaansho u haysan ama amarkiisa lagu bixiyey masuuliyadda ka dhalata waxa qaadaya qofkaas talada bixiyey ama daawaynta sameeyey.

**Qodobka 29aad**
**Xeer-hoosaadyo**

1. Dhamaan Xeer-hoosaadyada ka dheegma Xeerkan waxa diyaarinaya oo ansixinaya Gudidda.

**Qodobka 30aad**
**Burin**

Xeerkani waxa uu burinayaa dhammaan xeerarkii ka horreeyey ee ka hor imanaya ama aan la socon karin xeerkan.

**Qodobka 31aad**
**Dhaqangalka Xeerka**

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka ay ansixiyaan Golayaasha Sharci dejintu isla markaana uu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

| | |
|---|---|
| *Cfrisaaq Siciid Ayaanle* | *Baashe Maxamed Faarax* |
| *Xoghayaha. Guud ee Golaha Wakiilada* | *K/simaha Guddomiyaha Golaha Wakiilada ahna G/Xigeenka 1aad* |